

Codaynta iyadoo aan la lahayn ciwaan joogto ah



Cadayn deganaansho

Waxaad u baahan tahay ciwaanka aad degan tahay hadda (tusaale, hoy, guriga saaxiibka, meelaha bannaanka ah, iwm.) si aad isugu diiwaangeliso inaad codayso.

Ciwaanka meelaha bannaanka, ku qor isgoysyada waddada kana bixi sharraxaad halka aad seexato (tusaale, geeska Koonfur Galbeed ee Loring Park ee u dhow isgoysyada Hennepin Ave. iyo Oak Grove St.).

Maalinta doorashada, waxaad keeni kartaa shaqaalaha xarunta ama codbixiye ka diiwaan gashan aaggaaga si ay ugu dhaartaan inay shakhsi ahaan ogyihiin inaad ku nooshahay goobta aad sheegtay. Habkan waxa loo yaqaan xaqiijin.

Diiwaankaaga codbixinta waxaa laga yaabaa in lagugu su'aalo goobaha codbixinta, laakiin waxaad weli xaq u leedahay inaad codeyso

Haddii ciwaankaaga aan la xaqiijin karin, waxaa laga yaabaa in lagugu "carqaladeeyo goobaha codbixinta." Weli waad awoodaa inaad codeyso. Garsoorayaasha doorashada ee goobtaada codbixinta ayaa kuu dhaarin doona inaad degene tahay.

Sameyso qorshe codbixineed

Goobaha codbixintu waxay furan yihiin 7 a.m. ilaa 8 p.m.

Haddii aad safka ku jirto ka hor 8 p.m., waad codayn kartaa, xataa haddii ay kugu qaadato wakhti dheer inaad gaadho qaybta hore 8 p.m ka dib.

Caawimo ma uga baahan tahay dhanka isdiiwaan gelinta si aad u codeyso?

Shaqaalaha maktabadda deegaankaaga ayaa ku caawin kara. Ama boqo hennepin.us/elections

Ma rabtaa inaad ogaato goobtaada codbixinta? Booqo pollfinder.sos.state.mn.us

Si laguugu oggolaado inaad codbixiso, waxaad u baahan tahay inaad tahay:

1. Muwaadin Maraykan ah;
2. Ugu yaraan 18 jir Maalinta Doorashada;
3. Qofka degan Minnesota ugu yaraan 20 maalmood;
4. Qof aan loo xabisin xukun danbi culus
5. Qof aysan xukumin maxkamada inuu sharci ahaan codeyn karin.

Ma codayn karaa haddii...

Aanan haysan cinwaan joogto ah, aan ku noolahay meelaha bannaan ama gaarigayga?

HAA

Laygu soo oogay ama laygu helay fal-dambiyeed culus ama mid?

HAA

Aan ku jiro xabsiga, sugaya maxkamad ama xukun?

HAA

Aan ku jiro xabsiga inta aan ku jiro seeto-dheerada (probation) / xilli hore kasii daynta xabsiga (parole) dambiga awgiis, laakiin aan la ii xabisin xukun danbi culus?

HAA

Laygu soo oogay dambi, laakiin aan lay xukumin?

HAA

Lay siiyay joogitaan xukun maxkamadeed (stay of adjudication)?

HAA

Aan ku jiro seeto-dheerada (probation) / xilli hore kasii daynta xabsiga (parole) dembi aan ka galay gobol kale?

HAA

Aan ku jiro shaqo u sii deyn (work release), laygala socdo guriga, ku jiro seeto-dheerada (probation) ama xilli hore layga sii daayay xabsiga (parole) dembi culus awgiis?

HAA

Aan ku jiro seeto-dheerada (probation) / xilli hore kasii daynta xabsiga (parole) dembi aan ka galay federaalka?

HAA

Aan ku qaadanayo xukun culus xabsiga, guriga shaqada (workhouse), ama Xarunta Asluubta Dadka Waaweyn?

MAYA

Aan hadda ku qaadanayo xukun dembi culus xabsiga gobolka ama federaalka?

MAYA

Meesha lagala xiriirayo

612-348-5151

voteroutreach@hennepin.us

Saacadaha shaqada:
Isniinta ilaa Jimcaha
8 a.m. – 4:30 p.m.

